



Baroordiiqda Masiibadii Ka Dhacday Magaalada Uvalde, ee Gobolka Texas

Maayo 25, 2022

Bulshadda Qaaliga ah ee PPS,

Iyada oo ay soo baxayaan sawirada 19 ardayda ee fasalka afraad iyo macallimiintoodii ee Dugsiga Hoose Robb kuna yaala Uvalde, Texas, dhacdadani waxay jabisay qalbiyeyga. Markii aan maqlay waalid ahaan iyo macallimiin ahaanba masiibadani ugu dambaysay waxay igu dhalsay dareen aad u culus oo murugo leh. Waxaan murugada iyo cadhada la wadaagayaa geerida caruurta waxba aan galabsan iyo macallimiinta loo dilay sida arxan darada ah. Masiibadani waa ficil arxan darro ah, iyada oo qoysaska ay ka baxeen caruurtani aan qalbigeyga ku haynayo.

Masiibadani ugu dambaysay waxay ka dhacday dugsi ay ardayda wax ka barataa ay u badan yihiin bulshada ka soo jeeda Laatiinaha. Iyo iyada oo tani ay ku soo beegantay masiibooyinkii ka dhacay Buffalo, kuwaasi oo lagu beegsaday dadkii da'da ahaa ee ka tukaansanayey dukaan ahaana dad asalkoodu ka soo jeedo Maraykan-Afrikaanka, iyo kuwii ku tukanayey kaniisada ku taalay Koonfurka Gobolka California ee asal ahaan ka soo jeeday Maraykan-Taywaanka ahaa. Waxaad ka warqabtaan inaan inaguna aan la daalaadhacayno rabshadaha hubka loo addeegsanayo ee ka socda dariiqyada magalaada Portland.

Haddii aynu nahay hoggaamiyaasha dugsiyada, waxaan sii wadi doonaa inaan mudnaanta siino nabadgelyada iyo fayo-qabka ardaydeena. Waynu foojinaan doonaan iyada oo aan qaadeyno tallaabooyinki lagu xaqiijinayo nabadgelyada dhismayaasha dugsiyada. Waxaan aad ugu mahadcelineynaa shaqada muhiim ah ay qabanayaan la-taliyaasha ardaydeenu, shaqaalaha bulshadu, iyo xaqiidii doorka qof kasta oo mudakar ahi ka qaadanayo sidii loo hubin lahaa in arday kastaa oo ka mid ah ardaydeenu dareemo nabadgelyo isla markaana dareen togan la yeesho dugsiya.

Masiibadani waa fursad ku saabsan sidii aynu dhammaanteen ula hadli lahayn ardaydeena inaga oo u muujineyna sida aan jecelnahay iyo sida aan u rabno inay noqdaan kuwo nabadgelyadoodu sugan tahay. Haddii adiga- ama caruurtaadu aad u baahan tihiin gargaar dheeraad ah, waxaan kugula talineynaa inaad ka faa'iideysato agabyada ay kuu diyaariyeen Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS), oo ay ka mid yihiin tallo-bixinta iyo inaad heshaan agabyada badan oo loo diyaariyey bulshada. Fadlan waxaad la xiriirtaa dugsiyiina haddii aad rabtaan macluumaad ah ama gargaar dheeraad ah.



Haddii aad ka warwarsan tahay in qof naftiisa and dadka kale dhibaato gaarsiinayo, waxaan idinku dhiirigalineynaa inaad tallaabo degdeg ah ka qaado. Halkan waxaad ka heli kartaan qaar ka mid ah agabyada aad la xiriiri karto 24/7, 365 maalmood sanadkii:

- Haddii aad goobjoog ka tahay dhacdo ammaan darro ah taasi oo u baahan in si degdeg ah wax looga qabto, fadlan waxaad wacdaa telefoonka **9-1-1**.
- Haddii aad hayso macluumaad balse aan ahayn degdeg, fadlan waxaad la xiriirtaa khadka telefoonka ah ee degdega ahayn ee Booliiska Portland (**Portland Police non-emergency** line at 503-823-3333).
- Waxaad sidoo kale wici kartaa ee khadka telefoonka Dhibaatooyinka Caafimaadka Maskaxda Degmada Multnomah (**Multnomah County Mental Health Crisis Line at 503-988-4888**)
- Waxaad wargalin kartaa khadka telefoonka ee **Safe Oregon** fariin degdeg ah baad u diri karaa ama waxaad wacdaa telefoonka: 844-472-3367; email: tip@safeoregon.com; ama waxaad la degtaa app-ka Safe Oregon.

Fadlan waxaad booqataan shabakadaheena kala ah Maareeynta Xaaladaha Degdega ah ([Emergency Management](#)) iyo Caafimaadka iyo Guusha Ardaydeena ([Student Success & Health](#)) si aad faahfaahin dheeraad ah uga ogaataan sida aynu ugu diyaargarobno xaalada degdega ah iyo sida loo taageero caafimaadka maskaxda.

Inaka oo la tacaaleyna wararka masiibadani ka dhacday Texas, waa inaynu bulsho ahaan sii wadnaa wada shaqeynteenii wada jirka ahayd sidii aan u feejignaan lahayn iyada oo aan xaajijineyno inay dugsiyadeenu noqdaan kuwo nabadgelyo ah iyo lehna jawi kobcinaya waxbarashada ilmo kasta iyo qof kasta oo weyni.

Daacadnimo,

Guadalupe Guerrero
Guddoomiyaha Waxbarashada